HUS

# Ka hortagga cudurka aadka u daran ee RSV ee ilmaha yar

Dalkaan Finland gudihiisa daawada (*Beyfortus*) ee laga sameeyay nirsevimabi, taasoo loogu talaggalay ka hortagga caabuqa ku dhaca hawomareennada ee uu keeno fayraska RSV-, ayaa la siinayaa dhammaan carruurta dhalatay inta lagu guda jiro  xilliga qaboobaha ee 2024-2025, oo uu socdo cudurka safmarka ah ee RSV, waxaa kaloo la siinayaa carruurta xilligaas uu socdo cudurka safmarka ah ay da'doodu ka yar tahay saddexda bilood. Waxaa intaas dheer in nirsevimabi la siiyo carruurta da'doodu ka yar tahay halka sano ee ka tirsan kooxda u nugul halista caabuqa RSV.

RSV oo loola jeedo fayraska RS (*respiratory syncytial virus /* fayraska unugyada neefsashada) waa mid sida caadiga ah sababa ama keena caabuqa hawomareenka ee dadka da' walba leh. Faafista cudurkaan waxaa ay si aad u badan u soo ifbaxdaa dabayaaqada dayrta iyo xilliga qaboobaha. Waxaa uu si fudud ugu faafaa dhanka gacmaha ama hindhisada. Qiyaastii carruurta oo dhan wuxuu fayraska RSV ee sababa caabuqa hawomareenka ku dhacaa xilliga ay ku guda jiraan carruurnimada hore. Intooda ugu badan fayrasku waxaa uu uga soo ifbaxaa qaab hargab fudud ah.

Ilmaha dhallaanka ah ee aadka u yar cudurku wuxuu ku noqon karaa mid aad u daran. RSV waa sababaha ugu badan ee ilmuhu ay u galaan daryeelka isbitaalka. Ilmaha da'doodu ka yar tahay halka sano (gaar ahaan ilmaha da'doodu tahay saddexda bilood) fayrasku waxaa uu ku sababi karaa caabuq ku dhaca habdhiska hawomareenka hoose, kaasoo astaamihiisa ay ka mid yihiin qufac, xab ama balqan, cunto rabid la'aan, daal, neefsasho isku xigxigta oo dusha sare ah iyo neefsashada oo istaagaysa ama kala go'aysa. Waxaa dhici karta in astaamuhu ay si dhakhso ah uga soo daraan, ayna u baahdaan in ilmaha si degdeg ah loo geeyo isbitaalka, ama waxaa dhici karta in uu u baahdo daryeelka waaxda gargaarka degdegga ah.

Nirsevimabi waa lid jirgale ka hortaga fayraska RSV. waxaa uu si xoog ah uga hortagayaa caabuqa RSV ee aadka u daran. Saamaynta badbaadada waxaa ay bilaabaynaysaa islamarkiiba, waxaana ay soconaysaa inta lagu guda jiro halka wakhti oo xilliga RSV ah. Maaddada lid jirgalaha waxaa ay faa'iidada ugu badan leedahay, maka qofka la siiyo bilowga xilliga RSV. Nirsevimabi waxaa qofka loo siinayaa qaab ah hal cirbad oo muruqa looga mudaayo. Arrinka laga hadlaayo ma ahan tallaal. Nirsevimabi waxaa qofka la siin karaa, islamarka uu qaadanaayo barnaamijka tallaalka. Haddii hooyada la siiyay tallaalka RSV xilliga ay uurka leedahay ugu yaraan 2 toddobaad ka hor xilliga dhalitaanka, markaas ilmaha uma baahna Nirsevimabi.

Cilmibaaris lagu sameeyay Nirsevimabi waxaa lagu ogaaday in ammaankeedu uu wanaagsan yahay. Daawadaan kuma jiro wax fayraska RSV ah, mana ahan mid sababaysa caabuqa RSV. Saamaynta xun ee dhanka daawo ahaanta waa mid aad dhif u ah. Waxaa tusaale ahaan soo ifbixi

kara saamaynta xun ee dhanka daawada ee arrimaha ay ka midka yihiin, jir cuncun, xummad ama qandho, ama meesha cirbadda lagu muaday oo guduud ama cassaan noqota, barar ama xanuun.

Sida dhammaan daawooyinka kale oo dhan, waa in sidoo kale aad u diyaar garowdaa in ay daawada nirsevimabi keeni karto falcelin xasaasiyadeed. Waxaad u sheegtaa shaqaalaha, haddii ilmahaagu uu xasaasiyad ku qabo daawada nirsevimabi ama qaar ka mid ah maaddooyinka ay ka kooban tahay. Sidoo kale u sheeg shaqaalaha haddii ilmahaagu uu leeyahay dhibaatooyinka la xiriira dhiigbaxa ama xinjirowaga dhiigga, ama uu qaato daawada dhiig khafiifinta (verenohennus-lääke). Sida ugu dhakhsaha badan ugu sheeg shaqaalaha, haddii aad dareento astaamaha falcelinta xasaasiyadda, ama ay soo ifbaxaan astaamo kale oo adiga welwel kugu abuura.

Haddii ilmaha da'dodu ka yar tahay 3-da bilood ay qandho ama xummad qabato, waa in aad la xiriirtaa qaybta heeganka ee ilmaha. Haddii xaalad degdeg ama emerjensi ah ay timaaddo, waxaad mar walba wacdaa lambarka 112.

*Potilasohje | HUS Lasten ja nuorten sairaudet | Hyväksytty: 25.9.2024*